

Amar Sare: Guriga Joog Wixii Aan Baahiyo Daruuri ah Ahayn

23 Maarso, waxaan soosaaray Amar Guddoomiye 20-12, oo isla markiiba dhaqangalay ilaa ogaysiis dambe. Kani waa amar gobolka oo dhan ah. Ciddii raaci wayda amarka waxa loo arki doonaa inay khatar taagan ku tahay caafimaadka dadwaynaha.

Macluumaad dheeraad ah, fiiri [warsaxaafadeedkii ugu dambeeyey](#).

Si kooban, waa kuwan waxa la oggolyahay iyo wixii aan la oggolayn. Haddii aadan hubin hawl, iska daa. Joogista gurigu inta ugu badan ee suurtoagal ah wakhtigan waxay badbaadin nafo.

La Oggolyahay (waa inaad u jirsato 6 fuudh dadka kale):

- Cusbitaalada iyo daryeelka caafimaadka
- Tukaanada bagaashka
- Bangiyada
- Farmasiyada
- Cunto ka qaadashada makhaayadaha cuntada
- Tukaamada xayawaanka la rabbeeyo
- Kaalmaha shidaalka
- Tukaanada tafaariiqda qaarkood
- Hawlaha dibadda sida la lugaynta eygaaga, orodka, ama baaskiil kaxaysiga xaafadda aad deggan tahay
- Xarumaha daryeelka carruurta iyo carruur sii-haynta (kaliya haddii la raacayo xeerarka cusub)

Aan La Oggolayn:

- Kulamada bulshada (xafladaha, dabbaaldegyada) ee dad iskaga yimi meel gurigaaga ka baxsan
- U fariisiga cunto makhaayadaha
- Caweysyada habeenkii iyo riwaayadaha
- Ka tukaamaysiga moolalka dibadda ama gudaha iyo meelaha tafaariiqda isku jirka ah
- Dhisnaanta: Xarumaha jidh-dhiska, ciyaaraha iyo dhisnaanta, naadiyada caafimaadka, iyo istuudyaasha jimicsiga, istuudyaasha jaaska iyo yoogada
- Qurxinta: Meelaha timaha lagu qurxiyo, tima-jarayaasha, meelaha ciddiyaha lagu qurxiyo, qolalka duugista (masaajka), spa-da badqabka ee aan caafimaadka ahayn, tukaamada ashyaada la isku qurxiyo, qolalka taatuuga
- Maaweelada: Tiyaatarada, beeraha qosolka, arkeedhada, meelaha bowling-ka lagu ciyaaro, bandhigyada muusiga, dhacdooyinka ciyaaraha, madxafyada, meelaha samayska ah ee skating-ka lagu sameeyo
- Dibadaha: Beeraha nasashada, garoomada, dhulka tamashlaynta, barkadaha, beeraha skate-ka, xafladaha

Meesha laga keenay (Isha): <https://govstatus.egov.com/or-covid-19>